# Xeerka Gudigga



# Diiwaangelinta iyo Beddelida Ardayga

I. Ujeedada Xeerka

Ujeeddada xeerkaan waa in si siman loo bixiyo helidda xulashooyinka waxbarasho ee dhammaan ardayda deegaanka iyada oo loo marayo hannaan furan, caddaalad ah oo la heli karo iyo in la dhiirrigeliyo sinaanta iyo kala duwanaanta beddelka iyo qaadashada ardayda iyada oo la waafajinayo Xeerka Xulashooyinka Waxbarshada (6.10.022-P) . Xeerka wuxuu kordhiyaa Xeerka Guusha Ardayga (6.10.010-P), Xeerka Sinaanta Waxbarashada Jinsiyadaha ee Degmada (2.10.010-P), iyo xeerarka kale ee degmada iyo shuruudaha gobolka iyo federaalka.

II. Bayaanka Xeerka Guud

Dhammaan ardayda Dugsiga Dadweynaha Portland waxay xaq u leeyihiin inay ka qeybgalaan dugsiga xaafadooda, marka laga reebo xaaladaha aan caadi aheyn sida lagu sharaxay Qeybta IV. Dhammaan ardayda Dugsiga Dadweynaha Portland waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan beddelid si ay u dhigtaan dugsi ama barnaamij kasta oo ku habboon fasalka oo ku yaala degmada. Guddigu waxa ka go'an inay si siman ugu helaan qoysaska iyo ardayda tiro xulashooyin waxbarasho ah oo balaadhan. Degmada waxa saaran mas'uuliyada iyadoo adeegsanaysa isu-duwidda dhexe ee macluumaadka, wacyigelinta, iyo adeegyada taakuleynta, inay siiso qoysaska iyo ardayda macluumaad iyo tallo u sahli doonta qoysaska iyo ardayda inay go'aano xog ku dhisan ka qaataan xulashooyinkooga waxbarasho.

III. Qeexitaano

(1) Shuruudaha dugsiga iyo ardayga

(a) Dugsiga xaafada. Dugsi u adeega aagga imaanshaha loogu talagalay ama sida lagu qeexay 6.10.022-P.

(b) Dookha Diiradda. Dugsi ama barnaamij gaar ah oo si khaas loogu qaabeeyay manhaj ama mawduuc gooni ah ama sida lagu qeexay 6.10.022-P.

(c) Dugsiga u beddelashada Dugsiga uu ardayga u beddeshay.

(d) Ardayga beddeshay. Arday degmeed oo dhigta dugsi aan ahayn dugsiga xaafadiisa.

(e) Arday deegaan. Arday degan degmada Dugsiga Dadweynaha Portland.

(f) Aan deganeyn. Arday ka socda degmo kale oo dhigta

dugsiga degmada ee PPS isagoo usoo maray beddelashada degmooyinka dhexdooda.

(g) Walaal. Carruurta leh isla hal waalid ama isla hal kormeere oo qof weyn ah oo ku nool hal cinwaan.

(2) Shuruudaha qaadashada iyo beddelida

(a) Beddelid: Codsi rasmi ah oo ay u sameeyaan qoys degmeedku arday si uu u dhigto dugsiga aan ahayn dugsiga xaafadooda ama ugu soo noqdaan dugsiga xaafadooda. Waxaa jira laba nooc oo beddelid ah:

(A) Beddelida bakhtiyaa-nasiibka ah: codsiga in loo beddesho dookha diiradda. Beddelka bakhtiyaa-nasiibka ayaa ku saleysan helitaanka booska iyo doorbidada.

(B) Wareejinada codsiga: codsiga ku wareejinta dugsi xaafada oo ka duwan.

(b) Is-qoris: Hannaanka oggaanshaha ardayda dhigata dugsiyada.

(c) Habka gudbinta: Qaab loo qorsheeyay ardayda inay iskaga kala gudbaan koox-fasal dugsiyeed

IV. Baaxadda Xeerka

Xeerkaan ma khuseeyo ardayda aan degaanka ahayn, meelaynta waxbarasho ee khaaska ah, qaadashada kahor dugsiga xanaanada, ama qaadashada dugsiyada jaartarka ah. Si loo haqabtiro baahiyaha waxbarasho ee ardayda naafada ah, ardaydaas waxaa lagu meelayn karaa adeegyada barnaamijka khaaska ah ee ka baxsan dugsiga xaafadooda. Degmada sidoo kale waa inay u hogaansanto dhammaan sharciyada federaalka iyo gobolka iyo qawaaniinta ku saabsan isqorista iyo bedelidda ardayda.

V. Qaadasho

(1) Goob deegaan ahaan. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsiga xaafada ee ay kula yihiin waalidkood ama kormeeraha qaangaarka ah, marka laga reebo sida lagu sheegay Qaybta IV. Xuquuqdan waxay gaadhsiisan tahay ardayda arjiga bedelaadda ugu laabanayo dugsi xaafadeedkooga iyo qoysaska ardaydooda ay ku cusub yihiin degmada.

(2) Beddel ahaan. Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan u beddelida dugsi ama barnaamij aan ahayn dugsi xaafadeedkooga lagu meeleeyay

(a) U bedelashada dugsi kale oo xaafadeed: codsiyada beddelashada dugsi kale oo xaafadeed ah ayaa loo eegi doonaa nidaamka arjiga. Arjiyada waxaa loo eegi doonaa si shakhsiyeed ah iyadoo ku saleysan halbeegyo heerar leh, iyadoo tixgelin la siinayo boosaska bannaan ee dugsiga la codsaday.

(b) Wareejinada dooqa diirada: codsiyada loogu wareejinayo dooqa diirada waxaa lagu tixgelinayaa hanaanka baqtiyaanasiib iyo nidaamka diiwaangelinta furan kadib markii nidaamka wareejinta baqtiyaanasiibka uu xirmo. Codsiga u bedalashada dookha diiradda ayaa lagu saleeyaa codsi beddelashada ee aan dib-dhicin, jiritaan boos, halbeegyada qaadashada haddii ay jiraan iyo doorbiditaanka.

(3) Halbeegyada qaadashada ee dugsiyada iyo barnaamijyada dookha diiradda

(a) Halbeegyada qaadashada ee dugsiga ama barnaamij degmeed kasta waa inay u sinaadaan arday xaafadeedka iyo kuwa beddelashada.

(b) Halbeegyada qaadashada waa inay ahaadaan kuwa qeexan, ujeed leh, si toos ah ula xiriira yoolalka waxbarashada ee dookha diiradda iyo degmada. Dugsi ama barnaamij ayaa laga yaabaa inuu uga baahdo qoyska iyo ardayga inay muujiyaan fahamka filashada barnaamijyada kahor isqorista.

(c) Dooqyada diirada dugsiga dhexe iyo sare waxay lahaan karaan sharuuda diiwaangelinta sida lagu qeexay qorshaha howlgalada looga baahanyahay 6.10.022-P.

*(d)* Dookhyada diiradda ee dugsiga hoose ma lahaan doonaan halbeegyo qaadasho marka laga reebo halbeegyo luqadeed ee labo luuqad wax ku barashada iyo dib ka soo galidda ikhtiyaarrada laba luuqad wax ku barashada.

VI. Is-qoris

(1) Ardayda waxa laga filayaa laguna dhiirigelinayaa inay ku sii jiraan isla barnaamijka ama dugsiga ay ku qoran yihiin sannad dugsiyeedka, marka laga reebo xaaladaha duruufaha ee aan caadiga ahayn. Dugsiyadu waa inay la shaqeeyaan qoysaska, ardayda iyo shaqaalaha si loo haqabtiro baahiyaha ardayda sannadka dugsigaas.

(2) Ardayda ka qoran dugsiga beddelka ma aha inay dib u codsadaan illaa ay dhammaystaan dhammaan fasallada dugsigaas.

(3) Markay dhammaystiraan fasal-kooxeedka dugsiga, ardayda ayaa laga qoraa hab gudbinta dugsiga xaafadooda, marka laga reebo sida lagu xusay (4) iyo (5) ee hoose. Ardayda raba inay dhigtaan dugsi aan ahayn dugsi xaafadeedkooga waa inay raacaan hab-raaca qaadashada ee Qeybta V.

(4) Ardayda loo oggolaaday dookha diiradda ee ka gudba fasal-kooxeed dugsi una gudba mid kale uma baahna inay dib u codsadaan qaadashada inta lagu jiro kala guurkaan marka laga reebo sida lagu sifeeyay qorshaha hawlgallada ee dookha diiradda.

(5) Ardayda ka qoran manhaj ay ku jiraan fasal-kooxeedyo dugsiyo kala duwan ayaa iska qori kara dugsiga fasal-kooxeedyada sare leh kadib marka ay dhammaystiraan fasal-kooxeedkii hore.

VII. Doorbidyada

(1) Dhinaca dugsiyada iyo barnaamijyada dookha diiridda, haddii codsiyada beddelka bakhtiyaa-nasiibka ay ka badan yihiin boosaska banaan ee la heli karo oo ardayduna ay buuxiyaan halbeegyada qaadashada, haddii ay jiraan, doorbidyada ayaa habka soo socda u go'aaminaya mudnaanta meeleynta:

(a) Ardayda ka soo gudbayo fasal kooxeedka dugsiga haddi qorshaha hawlgallada dookha diiradda uu u baahan yahay.

(b) Ardayda waxaa looga baahanyahay sharciga gobolka ama faderaalka ama xeerka kale ee degmada inuu mudnaan helo.

(c) Ardayga walaalkiis isla waqtigaa ka qoran yahay dugsiga ardayga dookha koowaad uu u doortay dugsiga hoose, dhexe ama sare ama barnaamij ay ku jiraan fasal-kooxeed kale oo dugsi.

(d) Ardayda u qalma inay helaan cuno bilaash ama qiimo jaban, ama u qalma isqorista Barnaamijka Bilowga Hore (Head Start), saami uga dhigma celceliska degmada oo dhan. Doorbidyada ayaa loo eegi doonaa dugsiyada heerka ardayda qoran ee u qalma cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban ay ka hooseeyaan celceliska degmada oo dhan.

(e) Ardayda deegaanka ee wakhti wanaagsan gudbiyay codsi beddelaada bakhtiyaa-nasiibka ah.

(2) Haddii, kadib bakhtiyaa-nasiibka ay, shaqaaluhu helaaan inay jiraan codsadayaal u qalma cuntada bilaashka ah iyo ta la qiimo dhimay, ilaa heerka celceliska degmada, ee aan la ansixin tirada codsadayaasha walaalaha ah awgeed, Guddigu waxay dib u eegi

doonaan kala horeysiinta doorbidyada.

(3) Dookh diireedka ayaa laga yaabaa inuu sameeyo bixin khaas ah ee qorsho hawleedyada Guddiga ansixiyay ee lagu qaadanayo arday ka soo jeedo goob gaar ah.

VIII. Habka Beddelaada Ardayda

(1) Go'aannada beddelida ardayda waxa fududayn doona maamulaha loo xilsaaray isku dubarididda beddelida ardayda.

(2) Kormeeraha guud ayaa dejin doona hab-maamusyada iyo habraacyada, oo ay ku jiraan wakhtiyada kama dambaysta iyo habka rafcaanka loogu talagalay bakhtiyaa-nasiibka iyo arjiyada iyo beddelaadda degmooyinka dhexdooda ah.

(3) Kormeeraha guud ayaa dejin doona habka go'aaminta ka banaanshaha boos dugsi ama barnaamij gaar ah.

(4) Xaga dookhyada diiradda, kormeeraha guud ayaa dejin doona habka lagu aqbalayo ardayda oo ah bakhtiyaa-nasiib si dhexdhexaad loo maamulayo ee ardayda wakhti wanaagsan soo gudbiya codsi beddelaad bakhtiyaa-nasiib ah kana soo baxo halbeegyada qaadashada, oo ay jiraan codsadeyaal ka badan boosaska banaan.

(5) Wixii u wareejinada dugsiga xaafada ka duwan, nidaamka codsiga wareejinta wuxuu bixinayaa dib u eegida codsiyada shaqsiga ahaanta ku saleysan. Kormeeraha guud waa inuu dejiyaa nidaam cad, dabacsan, hab-maamus waafaqsan dhaqanka iyo jaangooyooyinka habka arjiyada beddelashada. Intaa waxa dheer, kormeeraha guud waa inuu dejiyaa hanaan lagu ururiyo laguna kormeero xogta laga soo gudbiyay codsiyada arjiyada beddelashada si loo hubiyo hanaan siman iyo go'aan gaaris iyo in la garto aagagga horumarineed ee dugsiyada xaafadaha.

(6) Si loo taageero yoolalka guud ee degmada iyo fursadaha waxbarasho ee loo siman yahay ee ardayda oo dhan, hanaanka beddelida sidoo kale waa inay ku jiraan sababahu sida looga baahan yahay in ay kor u qaadaan sinnaanta iyo kala duwanaanta ee qaadashada ardayda . Sababaha waxay ku saleysan doonaan Xeerka Sinnaanta Waxbarashada Jinsiyadaha ee Degmada (2.10.010-P) iyo Xeerka Guusha Ardayga (6.10.010-P). Sida loogu miisaami doono qodobada iyo hanaaanada habka bakhtiyaa-nasiibka waxa ansixin doona Guddiga.

(7) Liiska sugitaanka ee loo dejiyey dugsiga ama barnaamijka diirada dookha waa in si wareegto ah loogu go'aamiyaa bakhtiyaa nasiib, iyadoo lagu darayo doorbiditaano oo loo cabirayo sida lagu sheegay

xeerkaan.

IX. Takoor La'aan

(1) Dhammaan dugsiyada iyo barnaamijyada ay degmada bixiso waa inay u furnaadaan dhammaan ardayda iyadoon lagu kala takoorin sababo ku saleysan xaqiiqo walba ee la siiyay ka timid sharciyada gobolka iyo faderaalka iyo qawaaniinta iyo sida lagu sheegay 1.80.020-P.

Taariikhda: Waxaa la ansixiyay 5/12/03; La badelay 1/24/2005; 1/2015; La badelay 1/2024